



Xuquuqda iyo shuruudaha shaqo-helidda



Waxaad ka filayso shaqada



Markaad shaqo hesho oo aad Australia ka shaqaynayso waxaad leedahay xuquuq.



Xuquuqdaada waxay hubinaysaa:


- inaad qaadato mushaharka saxda ah ee shaqada aad qabanayso



- inaad ku mushahar-qaadato tirada saacadaha saxda ah



- gunooyinka ama lacg dheeraad ah oo xaq u leedahay sida



- kor-socodka shaqada saacado ka dheeraad ah inta caadiga ah
- qiyaasaha inta la bixinayo – qiyaas sare oo mushahar ah ee shaqaynta weekend-yada ama fasaxyada dadweynaha.



- fasax xanuunka haddii aad u baahato



- goob ammaan ah oo aad ka shaqayso



Waxaad kaloo leedahay xaq inaad ka mid noqoto ururada shaqaalaha.



Ururka shaqaaluhu waa haya'd taas oo ilaalisa dadka kuwaa oo ka shaqeeya nooca shaqada isla midka ah.



Waxaa jira dad kugu caawin kara inaad hesho waxa ay xuquuqdaadu yihiin:

- loo-shaqeeyahaaga



- qofkii ku isboonsaray




- garwadeenkaaga



Waxaad leedahay xuquuq kala duwan oo ku xiran dowlad-goboleedka aad ku nooshahay.

Xaaladaha shaqada

Shaqooyinku waxay leeyihiin xaalado kala duwan.



Haddii shaqadaadu tahay mid joogto ah waxaad helayaa waxyaalo dheerad ah sida:

- fasaxa jirada
- fasaxyada lacagtooda bixiyey

Xaashida waqtiga	
9:00am	5:00pm
9:00am	5:00pm
9:00am	1:00pm

Haddii shaqadaadu tahay mid marle ah waxa keliya oo aad ku mushaar qaadanaysaa saacadaha aad shaqayso.



Waxaad shaqayn kartaa:

- waqti-buuxa – maalin kasta



- waqti-dhiman – maalmaha qaarkood

9:00am – 5:00pm



- inta saacadaha shaqada lagu jiro – 9ka subixii ilaa 5galabtii



- habeenkii



Waa inaad keliya qaadataa shaqda haddii aad shaqayn karto saacadaha lagaaga baahan yahay.



Waxyaalaha kale oo muhiimka ah oo saamayn kara saacadaha aad shaqayn karto:


- qoyska
- masuuliyadaha waxbarasho
 - tababarka aad u baahan tahay inaad samayso
 - fasallada aad u baahan tahay inaad qaadato



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website-ka shaqo loo siman yahay (Fairwork).

www.fairwork.gov.au

Lacagta aad ka hesho mushaarkaaga



Mararka qaarkood lacag ayaa laga jaraa mushaarkaaga taas oo loo gooyo waxyaalo muhiim ah.

\$\$\$
Canshuurta Superka

Kuwaan waxaa loo yaqaan lacagtii la gooyey.



Lacagta la gooyey waxaa loo goyn karaa:

- canshuurta – lacagta aad u baahan tahay inaad siiso Dowladda



- khidmadaha ururka shaqaalaha haddii xubin ka tahay ururkaas



- manfacyo kale



Weydii dadka aad u shaqayso si ay kuugu sheegaan wixii ku saabsan lacagaha la gooyey markaad bilowdo shaqadaada.



Waxaad kaloo dooran kartaa in lacag lagaaga jaro si aad ugu bixiso biilashaada ama lacagta kirada.

Superannuation-ka



Superannuation-ku waa hab lacag loogu kaydiyo si aad ugu noolaato markaad howlgab noqoto.




Waa u caadi dadka inay dadku joojiyaan shaqada – howlgab noqdaan – markay gaaraan da'da 65 sano.



Ku dhawaad qof kasta oo shaqeeya waa inuu ka mid noqdaa hay'ad superannuation fund ah.

Sharci ahaan, dadka aad u shaqayso waa inay ku shubaan lacag kaydka superannuation-kaaga.



Waxaad kaloo lacag dheeraad ah ku shubi kartaa kaydka superannuation-kaaga haddii aad doonayso.



Waxaad kaloo macluuumad dheeraad ah ka heli kartaa superannuation-ka website-ka Xafiiska Canshuuraha Australia (Australian Taxation Office - ATO) iyo Moneysmart.

- www.ato.gov.au/super/
- www.moneysmart.gov.au/superannuation-and-retirement

Caafimaadka iyo ammaanka shaqada



Dowlad-goboleed iyo taritoori kastaa wuxuu leeyahay shuruuc si loogu dhowro shaqaalaha goobta shaqada.

Kuwaasna waxaa ka mid ah:



- siinta goob ammaan ah oo laga shaqeeeyo taas oo leh caawimaad aad isticmaali karto haddii aad u baahato



- kugu tababaraysa waxyaalaha aan ammaanka ahayn



- hubinta inaad caafimaad qabto markaad shaqada joogto



- haysashad shaqaale kuwaas oo wax badan ka garanaya caafimaadka iyo ammaanka isla markaasna caawin kara dadka kale



Waxaad u baahan tahay inaad raacdo xeerarka ku saabsan caafimaadka iyo ammaanka ee halkaad ka shaqaynayso.

Waa inaad:



- qabataa waxa uu maamulayaashaadu ku weydiiyaan inaad qabato



- xirataa dharka kaa dhigayaa ammaanka



- hubisaa in falalkaagu aysan ku dhaawicin adiga ama dadka kale



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website-ka Safework.

www.safeworkaustralia.gov.au

Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyey



Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka
ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee
Adeegyada Bulshada

